

Diyaarinta Nadiifinta Caloosha: Baaritaanka Kahor 1 ka Duhurnimo Golytely / Dulcolax

Waa muhim in aad raacdo **dhamaan** tilmaamaha lagu siiyo ee u diyaargarowga baaritaanka. Waa in jirkaagu nadiif ahaadaa sidoo kale si dhakhtarku u arki karo xilliga baaritaanka. Dadka qaar baa u arka in baaritaanka qeybta ugu adag ay tahay diyaarinta caloosha.

Isu Diyaarinta Baaritaanka

Maalin ka hor maalinta baaritaanka waxaa lagaa doonayaa inaad isu diyaariso baaritaanka. **Ha** cunin **wax** cunto ah maalinta ka horeysa baaritaanka. Waxa aad isticmaaleysaa **Golytely and Dulcolax** ee nadiifinta mindhicirada.

Fadlan si taxadar leh u raac dhamaan tilmaamaha. Haddii **aad** si haboon u raacin tilmaamaha waxaa suurogal ah in la **baajiyo** eegidda mindhiciradda. Si aad ugu diyaargarowdo eegidda mindhicirada, waxaa lagaa doonayaa inaad iibsato waxyaabaha caloosha lagu nadiifiyo.

Daawada aad iibsaneysa:

- Afar kiniin oo Bisacodyl/Dulcolax ah (5mg). Waa in aad kiniink afka ka qaadataa.
- **Farmashiyaha la xiriir oo ka qaado daawada lagu qoray ee Golytely/Nulytely/Colyte.**

(Uma baahnid in dhakhtar kuu qoro)

Dukaanka aad ka adeegato:

- Waxa aad ka iibsan kartaa (Crystal Light) si ay kaaga caawiso inaad isu diyaariso baaritaanka. Waa in aysan noqon midda **casaanka** ama **hurdiga** (purple) ka ah. (Khasab kuguma aha)

Waxaa ku soo wacaya kalkaaliye caafimaad oo qaabilsan diiwaangelinta 5 ilaa 7 cisho ka hor baaritaanka. Waxa ay ku weydiinayaan su'aalo kaa caawinaya u diyaargarowga baaritaanka, waxa ay kaala hadlayaan caafimaadkaaga; waxxayna kaa caawinayaan daawada aad qaadata ka hor iyo ka dib baaritaanka. Haddii aad qabto **wax** su'aal ah oo ku saabsan tilmaamaha, fadlan soo wac **(320) 229-4974** Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxeysa 8da aroornimo ilaa 4ta galabnimo. Waxa kale oo aad soo wici kartaa 1-844-795-1734. Haddii aad rabto inaad bedesho balanta, fadlan soo wac **(320) 229-4933**.

Shan (5) cisho ka hor maainta la eegayo mindhicirka

- **Ha qaadan** qaadan daawoyinka shubanka joojiya sida: Imodium ama Pepto-Bismol.
- **Ha qaadan** daawoyinka saraxada jiliciya – Sida: Metamucil ama Citrucel.
- **Ha qaadan** fatiimanada birta dhiiga xoojiya – Sida: Multi-vitamins.
- **Ha qaadan** fatimiin E ama daawada:

Sadex (3) cisho ka hor maainta la eegayo mindhicirka

- **Wax yar oo cuntada caloosha jilicisa ku bilow - Ha qaadan** cuntada aad caloosha u jilciya tusaale ahaan: Daangada, miraha (gabaldayaha, lawska iyo salbukada), rootida sareenka ka sameysan, miraha la qariido, ansalaatada, qudaarta ceyriin, ama markaa la soo jaray ama qalalan. Xadid inta aad hilibka ka cunto.

Laba (2) cisho ka hor maainta la eegayo mindhicirka

Biyo badan cab (sideed galaas oo biyo ayaa lagula talinayaa).

Hal (1) maalin ka hor maainta la eegayo mindhicirka

- Biyo cad oo kaliya cab **maalinta oo dhan** maalinta ka horeysa eegista mindhicirka. **Ha cunin** cunto adag
- **9ka aroornimo.**, qaado afarta kiniini ee Bisacodyl/Dulcolax. Biyo ku dar wwe aad ku shubtay Golytely/Nulytely/Colyte oo aad u ruxrux. Talaajada gasho Golytely.
- Haddii aad jeceshahay inaad cabto iyada oo aan la qaboojin, ka soo saar talaajada **1da duhurnimo**. Waxa aad ku dari kartaa baakad Crystal Light **koob** kasta oo aad cabeyso si u wanaajiso dhadhanka.
- **3da galabnimo** bilow cabitaanka Golytely/Nulytely/Colyte prep. Waa inaad cabtaa **sideed wiiqiyadood** koob ah **15kii daqiiqaba** ilaa aad ka **dhamaan** dhameyso. Waxa ay kugu qaadaneysaa afar ilaa lix saac in aad dhameyso waxyaabaha aad ku qastay. Waa khasab inaad dhameyso **dhamaan** cabitaanka aad qasatay.
- Waa inaad ka fogaan suuliga marka aad bilowdo inaad cabto Magnesium Citrate. Waxaa kugu dhacaya shuban waxaadna dooneysaa inaad markiiba musqusha gaarto. Dadka qaar baa dareema yalaalugo, dibiro ama matag. Haddii ay taasi dhacdo, ka naso 15-30 daqiiqo ka dibna isku day inaad cabto waxyaabaha aad isku qastay.
- Waxa aad ku dari kartaa baakad Crystal Light **koob** kasta oo aad cabeyso si u wanaajiso dhadhanka.

- Saqda dhexe jooji cabitaanka biyaha cad adiga oo ssidoo kale dhameeyey cabitaanka cabitaankii daawada lagu daray.

Maalinta eegista Mindhicirka

- Waxa aad cabi kartaa biyo ilaa **afar saacadood ka hor** balanta aad ku tageyso.
- Waxa aad qaadan kartaa daawada **adiga oo biyo yar ku kabanaya.**
- Xusuusnoow **ha cunin cunto adag.**